

# Isku Diyaarinta Shaqo-joojin: MACLUUMAADKA QOYSASKA DPS



## Waa maxay shaqo-joojini?

Shaqo-joojintu waa marka xubnaha shaqaalaha ee ururka shaqaaluhu diidaan, qaab muddaharaad ah, inay shaqeeyaan, sida badan si ay cadaadis ugu saaraan loo-shaqeeyahooda inuu yeelo dalabaadkooda.

Mid kamid ah waxyaalaha ugu muhiimsan ee aad samayn karto si aad qoyskaaga ugu diyaariso shaqo-joojin waa inaad xaqiijiso in macluumaadka lagaala soo xidhiidhaya uu sax yahay.



### Macluumaadka lagaala soo xidhiidhaya sax:

Gal Daaqada Waalidka [myportal.dpsk12.org](https://myportal.dpsk12.org) ama la xidhiidh xafiiska soodhawaynta dugsigaaga. Tani waxay kuu sahlaysaa in si dhakhso ah laguugu wargeliyo wixii isbeddelo ee si toos ah u saamaynaya qoyskaaga.



### Sax macluumaadkaaga daryeelka caafimaaadka:

Si aad u xaqiijiso in ilmahaagu helo daryeelka caafimaaadka ee uu u baahan yahay, xaqiiji in dugsigaagu hayso liiska saxda ah ee daawooyinka ilmahaaga.

## FAQ (su'aalaha badanka la iswaydiyo)

### MIYEE TAHAY ARDAYDA DPS INAY AADAAN DUGSIGA HADDII AY SHAQO-JOOJIN JIRTO? MIYAA ARDAYDA WAX LOO DHIGAYAA?

Haa. Dhammaan dugsiyadayadu way furnaanayaan saacadaha shaqada, ardayduna waa inay dugsiga sidii caadigii u yimaadaan. Shaqaalaha DPS oo aqoon leh, oo ay kujiraan macallimiin aqoon leh oo marti ah iyo maamulayaasha macallimiin laga dhigay, ayaa dugsiyada wax ka dhigi doonaa oo xaqiijin doona inay ardaydu ammaan yihiin inta dugsiga la joogo.

### HALKEE AYAAN KA HELI KARAA MACLUUMAADKA UGU DAMBEEYA EE WAXA DHACAYA MUDDADA SHAQO-JOOJINTA?



Booqo [teacherstrike.dpsk12.org](https://teacherstrike.dpsk12.org) oo akhri Hagaha Khayraadka Qoyska oo dhammaystiran, oo aad ka heli karto onlayn.



Nagala soco [Facebook](#) iyo [Twitter](#).



Wac Khadka Caawimada Qoyska oo ah 720-423-3054 inta u dhaxaysa 8 subaxnimo ilaa 4.30 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. Caawimada waxa lagu heli karaa luuqado badan!

### MIYUU DUGSIGAYGU MUDDAYN DOONAA ISBEDDELKA?

Maya. Xilliga shaqada ee dugsigu sidooda ayey sii ahaan -- oo ay kujiraan barnaamijyada Discovery Link (daryeelka dugsiga hortii iyo dabadii). Cuntada dugsiga iyo adeegga basku waxay raaci doonaan jadwalkii caadiga ahaa, sidoo kale.

### DUGSIYADU MA SII WADI DOONAAN BIXINTA CUNTADA?

Haa. Adeegga cuntada dugsigaagu wuxuu sii wadi doonaan inuu cuntooyinka oo dhan sidii caadiga ahayd u bixiyo.

### MIYEE BASASKA DUGSIGU SII WADI DOONAAN INAY SHAQEYAAAN MUDDADA SHAQO-JOOJINTA?

Haa. Adeegyada gaadiidku isbeddeli maayaan waxayna sii wadi doonaan keenista iyo qaadista ardayda dugsiga sidii loogu talagalay.

### MIYEE ISBOORTIYADA IYO HAWLAHA KALE EE DUGSIGA HORTII - IYO DABADII AY SII SOCON DOONAAN INTA SHAQO-JOOJINTU SOCOTO?

Fadlan ka hubi dugsigaaga macluumaad dheeraad ah, maadaama tan ay ku kala duwanaa karaan dugsiyadu.

### KAQAYBQAADO

Waxaad wakhtigaga ugu deeqi kartaa oo aad kaga shaqayn kartaa dugsigaaga oo aad ka caawin kartaa fasalka ama garoonka ciyaarta. Macluumaad dheeraad ah, fadlan la soo xidhiidh xafiiska soodhawaynta dugsigaaga ama khadka caawinta qoyska 720-423-3054. Waad ku mahadsan tahay caawintaada!